

IYO SHAGALLAHA MARAYAKAN KA

WASAARADDA SHAGADA

QAYBTA MUSHQAAYADDA IYO SAACADDA



Sida Loo Xerey Caabashada

**Arrimaha Mushqaayadda iyo Goobta-shaqada ee
ay Dhaqangeliso WHD:**

Saacadaha

Mushqaayadaha

Shaqaynta Carruurta

Waqti dheeraad

Diiwaan-haynta

Davis-Bacon

Dhaqangelinta Sharciga Shaqada

Saacadaha la Shaqeyyay

Mushqaayadda Ugu Yaraanta

Mushqaayadaha Haatan Jira

Hawlahaa Dhismayaasha

U Maqnaashaha Qoyska

Qandaraasyada Adeegga

Qandaarasyada Dowladda

Shaqada Beerta

1-866-487-9243

www.dol.gov/whd

WH1498 SOM 0117



Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Maraykanka Qaybta Mushqaayadda iyo Saacadda (WHD) ayaa mas'uul ka ah maamulitaanka iyo dhaqangelinta qaar ka mid ah xeerarka ugu muhiimsan ee qaranka markay tahay xaqa ilaalinta shaqaalaha. WHD ayaa u heellan inay hubiso in shaqaalaha dalkan sida habboon lacgtooda shaqada loo siiyo iyo dhammaan saacadaha ay shaqeeyaan, iyada oo aan loo eegin xalaadda imgreeshinka qofka.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah, waxaad nagala soo xiriiri kartaa **1-866-487-9243** ama booqo **www.dol.gov/whd**, halkaas oo laguu tilmaami doono xafiiska WHD ee kuugu dhow si aad u hesho caawimo. Wawa jira 200 in ka badan oo ah xafiis yada WHD dalka oo dhan oo ay joogaan hawlyayaanno tababbaran oo adiga ku caawiya. Macluumaadka hoosta ku qoran ayaa waxtar u leh marka lagu xereynayo cabasho WHD:

- Magacaaga
- Cinwaankaaga iyo lambarka telefoonkaaga (sida adiga laguula soo xiriiri karo)
- Magaca shirkadda aad ka shaqayso(aad shaqayn jirtay)
- Goobtay ku taal shirkaddu (taasi waxa laga yaabaa inay ka duwan tahay meeshii aad ka shaqayn jirtay)
- Lambarka telefoonka shirkadda
- Magaca maareeyaha ama milkiilaha (qofka aan weyddiisanayno inaan la hadalno)
- Nooca shaqada aad soo qabatay
- Sida iyo goorta lacag bixinta laguu siiyaya (tusaale ahaan, jeeg ah Jimce kasta)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad bixin karto, sida nuquallada gunta jeegagga, diiwaanka shahsiyeed ee saacadaha la shaqeeyay, ama faahfaahinta ku saabsan hab dhaqanka lacag bixinta loo-shaqeeyahaaga ee, ayaa laga yaabaa inay waxtar yeelato.

Adeegyada oo dhan ayaa ah lacag la'aan oo asturan, haddii aad diiwaangashan tahay ama haddii kaleba. Fadlan xusuusnow inaanloo loo-shaqeeyahaagu shaqada kaaga eryin karin ama hab kaleba kugu takoori karin adiga maadaama aad cabasho ku xereysay WHD.

Haddii WHD ay ku caawin kari weydo, waxaan dadaal kasta u samayn doonaa inaan kuu dirno hay'adda ama ururka ku habboon arrinta.